



XAFIISKA QARAMADDA MIDDQBAY U QAALIBLSAN KAALMAYNTA SOOMAALIYA (UNSOM)

Faafin Degdeg ah

WARSAXAAFADEED 13/2014

Ergaygga Qaramaada Midoobay oo ku baaqay in dulqaad iyo Xasilooni laga muujiyo arrimaha Gobolka Sool

Muqdisho, 16 April 2014 - Ergaygga Gaarka ah ee Qaramadda Midoobay u qaabilsan Arrimaha Soomaaliya, Nikolas Kay ayaa dareen ka muujiyay shaqaaqadda ka dhexdhalatay ciidamo ka socda Soomaaliland iyo kuwo ka socda Puntland, oo ku murunsan Gobolka Waqooyi ee Sool, gaar ahaan magaaladda Taleex.

“Waxaan ku baaqayaa in la muujiyo dheganaansho. Xaaladda laguma xalin karo hab ciidan. Dhamaan dhinacyada ay arrintu khusayso waa in ay muujiyaan dulqaad, kuna kicin ficil keeni karo dagaal. Waana in ay sida oogu dhakhso badan u damiyaan buuqa jira/ ama u qaboojiyaan xaaladda. Waana in ay ku xalliyaan arrimahooda si ay ku dhehantahay xasilooni, nabad iyo isu tanaasulid. Dadka Soomaaliyeed way soo dhibtoodeen in kufilan, waxayna ogyihiin in wax wanaag ah aan lagu gaareeynin dagaal iyo amni la’aan. Xafiiska UNSOM iyo Bulshada Caalamka ayaa labaduba ku baaqaayo in la muujiyo dulqaad aad u weyn. Waxaan diyaar u nahay inaan dhinacyada ka taageerno wixii dhexdhexaadin ah” ayuu yiri Egreyga Gaarka ah.

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xidhiidh Sarkaalka UNSOM u Qaabilsan Warbaahinta Aleem Siddique
Tel: +254 41 350 6603 • Email: unsom-spokesperson@un.org

Fadlan eeg rugta Internet-ka:
www.unsom.unmissions.org



@UNSomalia

facebook.com/UNSomalia